


Aabahay sharafta badan adaa bulshada bedeli kara



Gudniinka fircooningaa bulshada, hablaha, dumarka iyo qoysaska soomaaliyeed wuxuu ku hayaa dhibaatooyin badan oo adag. Xannuuno fara badan ayuu ku hayaa hablaha iyo haweenkaba. Waa dulmi iyo dembi toos ah. Diintena quruxda badan hablaha sharaf iyo karaamo ayey siisay maalintey dhasheen. Fircoonigu weligii ceeb kamuu hortagin, cidna muu sharfin ee sharafi waa tey diinta islaamku keentay.

Aabahay qaaligaa ee sharafta badan adaa dhaqankan jahligaa wax ka bedeli kara. Ku dhiirri geli bulshadeena meel kastoy aduunka ay ka joogaan , in ay dhaqankan joojiyaan. Taageer habalaha iyo dumarka caafimaadkooga. U dood xuquuqaha aw islaamku siiyay hablaha iyo dumarkaba.

Wacyigelintaada caafimaadkooga buu hor marinaya. Markay dumarkeenu iyo hablaheenu caafimaad qabaan bulshada oo dhan baa caafimaad qabta.

Aabahay qaaligaa ee sharafta badan adaa
dhaqankan jahligaa wax ka bedeli kara.